

Xeer Madaxweyne J. - 6 Luulyo 1964, lamba. 169

Ku dhawaaqid xaalad degdega ah.

Madaxweynaha Jamhuuriyadda

Markuu arkay qodobbada 70, 75 ee Dastuurka;

Markuu arkay qodobbada 70 iyo 71 ee Sharciga 26 Agoosto 1963, lamba. 21 ee "Nidaamka Amniga Dadweynaha";

Markuu tixgeliyay in, ka dib ansixin la'aanta Golaha Shacbiga ee Xeerkii loogu dhawaaqay xaaladda degdega ah ee 8 Febraayo 1964, kan dambe, inkastoo ilaa iyo hadda ay jiraan isla shuruudahii iyo sharcigii xalaasha ka dhigay in la soo saaro, waa in loo tixgeliyo inay dhaceen;

Markuu garwaaqsaday in loo baahan yahay lama huraanna ay tahay in si degdega ah loo saaro xeerar cusub oo la xirirro arrintan;

Isagoo ka duulaya soo jeedinta Wasiirka Arrimaha Gudaha;

Markuu Dhageestay Golaha Wasiirada;

Wuxuu Xeeriyay

Qod. 1

Xaaladda degdega ah ayaa lagaga dhawaaqay guud ahaan dhulka Jamhuuriyadda. Oggolashihiisa ayey Gudomiyeyasha.

Gobollada oo dhul ahaan karti iyo awoodba u leh in ay soo saaraan amar deg deg ah si waafaqsan qod. 71 ee sharciga 26 Agoosto 1963 lamba. 21.

Qod. 2

Wasiirka Arrimaha Gudaha, ama amarkiisa, Gudoomiyaasha Gobollada ee awoodda dhuleed leh, waxay awoodaan inay soo saaraan amarro degdega ah oo waafaqsan qod. 71 ee Xeer 26 Agoosto 1963, lamba. 21.

Qod. 3

Fulinta Awaamiirta aan kor ku soo xusnay waxaa loo igmaday Ciidamada Milateriga iyo Booliska.

Qod. 4

Xeerkan si degdega ah ayuu u dhaqan galayaa; waxaana lala socodsiin doonaa Golaha Shacbiga maalin caadi ah.

Muqdisho, 6 Luulyo, 1964.

Aden Abdulla Cismaan

Raiisul Wasaaraha

Abdirizak Hagi Hussien

Wasiirka Arrimaha Gudaha

Abdulcadir Cadir Mohamed Aden